

Soomaali Somali

Mashruuca Caymiska linta Qaranka (National Disability Insurance Scheme) iyo Xuquuqda ka Qaybgalayaasha

Mashruuca Caymiska Qaranka ee linta (The National Disability Insurance Scheme) (NDIS) waa cusub oo loogu talagalay dadka iinta qaba si ay u helaan kaalmada ay u baahan yihiin si ay ugu noolaadaan nolol fiican.

NDIS iyo xuquuqdaada:

- Ahow amaan, la ixtiraamay, raadina kaalmo iyo adeegyo tayadoodu sarayso.
- Weydiiso mutarjum aqoon leh kaas oo kaa caawima inaad la hadasho dhamaan adeegyada, taas macneheedu waxa weeye NDIA iyo adeegyada ku caawimaya waxay ka mid yihiin Qorshahaaga NDIS.
- Dooro adeegyada aad hesho iyo siday u bixiyaan kaalmadaada.
- Ka hadal wixii ku saabsan welwelkaaga kana dacwood haddii aadan ku faraxsanayn go'aanada ama adeegyada aad helayso.

NDIS waxay go'aamisaa:

- Haddii kaalmo aad ka heli karto NDIS
- Nooca kaalmada ah oo aad ka heli karto
- Inta aad kaalmo ka heli karto

Haddaadan ku faraxsanayn wixii ku saabsan go'aanka ay samaysay NDIA waxaad awoodaa:

1. Weydii NDIA inay dib u eegto go'aankaan, tan waxaa loogu yeeraa **dib-u-eegida gudaha** . Waxaad haysataa 3 bilood laga bilaabo waqtigaad hesho qorshahaaga ama warqada go'aanka si aad u weydiiso NDIA inay dib u eegto go'aanka.
2. Haddii aadan ku faraxsanayn natiijada dib u-eegida gudaha waxaad awoodaa in go'aanka uu dib u-eego **Taraybuunalka Rafcaanka Maamulka**, taas waxaa loogu yeeraa **dib-u-eegida dibad ka ah**.
3. Waxaad heli kartaa caawimo si aad u weydiisato dib u eegida dibada ka ah oo ay sameeyaan **Saraakiisha Kaalmada Rafcaanka NDIS** kuwaas oo aan qayb ka ahayn NDIS. (ka eeg bogga dhinaciisa kale liiska hay'ada Rafcaanka ee hay'adaha NDIS Queensland).

Helida caawimo lagu hirgeliyo qorshahaaga NDIS

Haddii aad u baahan tahay caawimo aad ku hesho kaalmada iyo adeegyada qaybta ka ah Qorshahaaga NDIS, waxaad la xiriiri kartaa:

- Xiriiriyahaaga kaalmada, haddii aad ku hesho kaalmadaan Qorshahaaga NDIS
- Xiriiriyaha agagaaraha (LAC) goobtaada: <https://www.ndis.gov.au/contact/locations>
- Xafiiska agagaaraha NDIS: 1800 800 110 weydiina inaad la hadasho xafiiskaaga NDIS.

Waa ok inaad la hadasho waana ok inaad dacwooto

1. Waxaad leedahay xaq inaad ka hadasho welwelkaaga aadna samayso cabasho la xiriirta NDIA, haddii aadan ku faraxsanayn adeegyadooda. Waxaad samayn kartaa tan adigoo:
 - Qofk kala hadlaya [Xafiiska NDIA](#).

- Buuxinaya [foomka cabashada](#) taas oo aad geynayso xafiiska NDIA
 - Adigoo ka wacaya NDIA tel: 1800 800 110
 - Email u diraya feedback@ndis.gov.au.
 - Wacaya [Commonwealth Ombudsman](#): Tel: 1300 362 072
 - Haddii aadan ku faraxsanayn natiijadaan waxaad la xiriiri kartaa hay'ada u-doodista ee agtaada ah (arag liiska hay'adaha u-doodida).
2. **Dhib maaha inaad ka hadasho aragtina ka dhiibato ama ka dacwooto adeegyada aad hesho taas oo qayb ka ah Qorshaha NDIS. Haddii aadan ku faraxsanayn waxaad awoodaa:**
- Inaad kala hadasho adeegbixiyahaaga waxyaallaha ku saabsan welwelkaaga ogowna haday caawimi karaan. Waxaa laga yaabaa inay awoodaan inay wanaajiyaan siday kuu caawimaan adiga ama xubnaha qoyska. Waxaad kaloo weydiin kartaa qof aad aaminsan tahay ama u doode inuu ku caawimo inaad la hadasho adeeg bixiye. (arag liiska hay'adaha u-doodida).
 - Bedel adeegbixiyayaasha, taas macneheedu waxa weeye waxaad dooran kartaa adeeg bixiye cusub ama xiriir kaalmo oo cusub. Waxaad weydiisan kartaa NDIA, xiriiriyaha goobta agtaada ah ama xiriiriyaha kaalmada cusub. Waxaad weydiin kartaa NDIA, Xiriiriyaha goobta agtaada ah ama u-doode kaa caawima arrintaan.
 - La xiriir **Guddiga Tayada iyo Ilaalinta NDIS (NDIS Quality and Safeguards Commission)** weydiina inay xaqiijiyaan in xuquuqdaada la ilaaliyey aadna hesho kaalmo taya sarre leh iyo adeeyo. **Guddigu** wuxuu bixiyaa caawima qarsoodi ah, lacag la'aan oo madaxbanaan si loo xaqiijiyo in ka qaybgalayaasha NDIS ay kuu hellaan kaalmooyin wanaagsan.

Hay'adaha kaa caawin kara cabashada, rafcaanka iyo dib u eegida.

1. NDIS Quality and Safeguards Commission

Tel: 1800 035 544 (wicid lacag la'aana telefoonka aan moobaylka ahayn)

www.ndiscommission.gov.au/participants/complaints

Adeega Afcelinta iyo Tarjumaada Qoraalka (TIS National) Telefoon: 131 450

Adeega Gudbinta Qaranka (National Relay Service <https://internet-relay.nrsccall.gov.au>)

Mail PO Box 210, Penrith, NSW 2750)

2. Hay'adaha Rafcaanada NDIS ee Queensland

- Speaking Up For You Inc.: [Brisbane / Moreton Bay](#) Tel: 07 3255 1244 ama Email: sufy@sufy.org.au
- [Queensland Advocacy Inc. : State-wide](#) Tel: 07 3844 4200 ama 1300 130 582 ama Email: NDISAppealsSupport.qai@qai.org.au
- People with Disability Australia Inc.: [State-wide](#) Tel: 02 9370 3100 ama 1800 422 015 Email: pwd@pwd.org.au
- Independent Advocacy in the Tropics: [Townsville iyo dhulka ku wareegsan](#) Tel: 1800 887 688 Email: reception@iat.org.au
- Rights in Action Inc: [Cairns, Yarrabah, Tablelands - Atherton iyo Mareeba](#) Tel: 07 4031 7377 Email: info@rightsinaction.org

3. Hay'adaha U-doodida ee Queensland

Haddii aad u baahan tahay inaad kala hadasho tabashadaada waxaa laga yaabaa inaad kaalmo ka hesho hay'ada u doodida si aad taas u samayso.

AMPARO Advocacy (<i>Brisbane</i>)	3354 4900
Capricorn Citizen Advocacy (<i>Rockhampton</i>)	4922 0299
Gold Coast Disability Advocacy Inc.	5564 0355
Independent Advocacy in the Tropics (<i>Townsville</i>)	4725 2505
Ipswich Regional Advocacy Service	32816006
Mackay Advocacy Inc.	4957 8710

Queensland Advocacy Inc.	3844 4200
Rights In Action Inc. (<i>Cairns</i>)	4031 7377
Speaking Up For You Inc. (<i>Brisbane/ Caboolture</i>)	3255 1244
Sunshine Coast Citizen Advocacy	5442 2524
The Advocacy and Support Centre Inc. (<i>Ipswich</i>)	3812 7000
The Advocacy and Support Centre Inc. (<i>Toowoomba</i>)	4616 9700
People with Disability Australia Inc. (<i>Bundaberg, Fraser Coast, Logan, Mt Isa, Sunshine Coast</i>)	1800 422 015

4. Ombudsman-ka Dawlada Dhexe

Waa hay'ad madax banaan taas oo baari karta dacwooyinka ku saabsan hay'adaha Xukuumada Australia, kuwaas oo ay ku jirto NDIA. Tel: 1300 362 072 ama Adeega Afcelinta iyo Tarjumida Qoraalka (TIS National) Tel: 131 450 www.ombudsman.gov.au/what-we-do/working-with-people-with-disability